



## XAFIISKA QARAMADA MIDOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Faafin Dedeg ah

### **WARSAXAAFADEED 31/2014**

**Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya oo cambaareeyay weerarki lala begsaday Baarlamaanka.**

Muqdisho, 5 July 2014 - Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya (SRSG), Nicholas Kay ayaa cambaareeyay weerarki lala begsaday Baarlamaanka Soomaaliya iyo dilalka badan ee ay sheegatay Alshabaab tan iyo marki ay bilaabatay bisha barakeysan ee Ramadaan.

“Waxaan cambaareynayaas weerarki fashilmay ee saakay lala begsaday Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed. Waxaan bogaadinayaas geesinimada ay muujiyeen xoogaga amaanka kuwaas oo naftooda u waayey ka hor tagga argagixisada. Alshabaab waxay dadka Soomaaliyeed u adegsadeen bambaanooyin, dilal qorsheysan iyo argagax gelin ay ka fuliyeen Muqdisho gudeheeda tan iyo markii ay bilaabatay bisha barakeysan ee Ramadaan oo ah bil cibaado iyo nabad. Waxaan ugu baaqayaa dhamaan dadka Soomaaliyeed in ay midoobaan oo ay la shaqeeyaan hay’adaha dowlada si looga hor tago weeraro kale iyo si cadaalada loo hor keeno kuwii ka dambeeyay ololahan waxashnimada ah ” ayuu yiri SRSG Kay.

“Qaramada Midoobay waxay si dhow ugala shaqeyneysaa dadka Soomaaliyeed sidii loo dhisi lahaa nabad iyo dowlad cusub oo shaqeyso. Waxaan si buuxda ula shaqeyneynaa Dowlada Federaalka, AMISOM iyo Jaallayaasha Caalamka si loo dhiso ciidanka amaanka qaranka Soomaaliyeed oo xoog leh si ay u ilaaliyaan uguna adeegaan dhamaan dadka Soomaaliyeed” ayuu raaciyyay.

SRSG Kay ayaa tacsi kal iyo laab ah u diray qoysaskii iyo asaxaabti dadka geeryoday. Sidoo kale wuxuu tacsi u diray Baarlamaanka Fadaraalka Soomaaliyeed, wuxuuna u rajeevay intii dhaawacantay in ay dhakhso u bogsoodaan.

Dhamaad.